Oggolaanshaha Daryeel iyo Daweyn Caafimaad: Waan oggolahay dhammaan daryeelka caafimaad iyo qalliin, baadhitaanada, iyo tijaabinta la go'aamiyo inay lagama-maarmaan ii yihiin mudada aan ahay bukaan lagu daryeelo OhioHealth. Waan fahmay in isticmaalka dawo iyo qalliin aanay markasta ahayn sax iyo in daweynta caafimaad ay keeni karto halisyo, dhaawac, ama xiitaa geeri. Waxa aan qirayaa in aan wax damaanad-qaad ah la ii sameyn oo ku saabsan natiijada(natiijooyinka) daweyn, hawlgal, ama baadhitaano la igu sameyn doono mudada aan ahay bukaan lagu daryeelo OhioHealth.

Diidmo Daweyn: Waan fahmay in haddii aan diido daweyn la ii soo jeediyay ama haddii aan dhammeystiri waayo hab daweyn oo la iigula taliyay, mas'uuliyadda cawaaqibka ama wixii ka yimaadda diidmadayda ama dhammeystir-la'aanta ma saari doono OhioHealth ama shakhsi kale.

Bixinta Macluumaad: Waxa aan OhioHealth amar u siinayaa inay bixiyaan koobiyada/nuqulada qayb ama dhammaan diiwaanadayda caafimaad ee la sameeyay intii lagu jiray cilad-sheegid iyo daweyn la ii sameeyay oo la siiyo caymis bixiye kasta, bixiye magdhow shaqaale, hay'ad gargaar bulsho, ama cid kale, ee laga yaabo inay gargaar dhaqaale siiyaan cisbitaalkayga, daryeel caafimaad iyo/ama kalkaalin. Waan fahmay in macluumaad bixintan ay ku jiro karta macluumaad ku saabsan baadhista Fayraska Dila Difaaca Jidhka (Human Immunodeficiency Virus) (HIV), Aydhis (Acquired Immune Deficiency Syndrome)(AIDS) ama xaalad(o) la xidhiidha Aydhis, xaalad(o) cudur maskax, iyo/ama isticmaal-xumida aalkolo ama daroogo. Waxa kale oo aan amrayaa bixinta macluumaad caafimaad oo loo adeegsanayo kormeerka isticmaalka iyo sugidda tayada lana siiyo caymiskayga ama qandaraaseyaashooda taasoo ah sida ay rabaan sharciyo kasta oo ah kuwo magaalo, gobol, ama federal. Waxa aan OhioHealth amar u siinaya inay macluumaad caafimaad siiyaan dhakhtarka qoyskayga, dhakhtarka gudbinta, ama bixiye daryeel oo kasta oo si toos lug ugu leh daryeelka caafimaadkayga. Waxa aan halkan oggolaanshaho cad ku siinayaa OhioHealth iyo wakiiladeeda inay igala soo xidhiidhaan lambar teleefon kasta (oo uu ku jiro lambarka teleefonkayga gacanta) ee aan siiyay shaqaalaha OhioHealth una siiyay ujeedo sharci ah oo la xidhiidha daryeelkayga OhioHealth iyo wixii ah la-sii-socod kale oo kasta ama daryeel ah mustaqbalka, iyada oo la adeegsanayo habab ay ku jiraan isticmaalka nidaamyada teleefon garaacista ee otomaatig ah ama farsamo kale oo kombiyuutar gargaarayo. Oggolaanshahan waxa qabanaya dib-uga-noqosho qoran oo uu sameeyo bukaanku ama haddii aanay jirin dib-uga-noqosho wuxu dhici doonaa mudo ah hal sanno laga bilaabo taariikhdan.

Wareejin Anfacyo/Bixiyeyaal Cid Saddexaad: Marka la fiiriyo dhammaan adeegyada daryeel caafimaad ee la siiyay ama la siin doono aniga ama bukaanka hoos ku magacaaban, waxa aan halkan ku wareejinayaa dhammaan xaq, magac, iyo dan la xidhiidha anfacyo cid saddexaad ee ka imanaya dhammaan heshiis caymis, qorsheyaal anfac shaqaale iyo/ama bixiyeyaal cid saddexaad taasoo ah qaddar aan ka badnaan doonin kharashyada joogto iyo caadi ah ee OhioHealth ee loogu talogalay adeegyo daryeel caafimaad oo la bixiyay. Waxan amrayaa bixinnada sidaas oo kale ah ee ka imanaya bixiyeyaashayda caymis, bixiyeyaal cid saddexaad, iyo cid saddexaad oo kasta. Waxan oggolaanayaa weydiisasho kasta oo ah dib-u-fiirin ama racfaan uu sameeyo OhioHealth si looga doodo go'aamin anfacyo uu sameeyay bixiye cid saddexaad, caymis ama qorshe anfac shaqaale. Marka laga reebo sida uu rabo sharcigu, waxan qaadanayaa mas'uuliyadda hore u go'aaminta ee ku saabsan in adeegyada la siinayo uu dabirayo caymiskaygu ama bixiye cid saddexaad.

Mas'uuliyad Dhaqaale: Iyada oo uu qabanayo sharciga la dabiqi karo iyo qodobada iyo shuuradaha heshiis kasta ee la dabiqi karo ee u dhexeeya OhioHealth iyo bixiye cid saddexaad, iyo iyada oo la tixgalinayo dhammaan adeegyada daryeel caafimaad ee la siinayo ama la siin doono bukaanka hoos ku magacaaban, waxan oggolahay inaan dhaqaale ahaan mas'uul ka noqdo oo ay waajib igu tahay inaan OhioHealth siiyo isku-darka kharashyadeeda aan lagu bixin hoosta "Wareejin Anfaco" ee hoos lagu sameeyay. Baaqi kasta oo oo ka yimad cisbitaal dhigis kasta oo aan oggolaaday inaan dhaqaale ahaan mas'uul ka ahay waa in la bixiyo wakhtiga ka sii-daynta cisbitaalka. Dhaammaan baaqiyada kale waa in lagu bixiyo gudaha soddon (30) maalmood ka dib helista qaansheegad ama caddeyn xisaab. Waan fahmay inaan mas'uul ka noqon doono kharashyada adeegyo kasta oo la i siiyay oo aan lagu dabiri karin Medicare, caymis ama bixiyeyaal kale.

Cadeynta in la Oggolaado Anfacyo Caafimaad oo la Siiyo Bixiye iyo Dhakhtar(Dhakhaatiir): Waxa aan cadeynayaa in macluumaadka aan bixiyay aniga oo weydiisanaya lacag-bixin hoos timaada "Title XVIII" ee Xeerka Sugidda Bulshada (Social Security Act) uu sax yahay. Waxan cid kasta oo haysa macluumaad caafimaad ama macluumaad kale oo igu saabsan ay Maamulka Sugidda Bulshada (Social Security Administration) iyo/ama Barnaamijka Medicare ama u-dhexeeyeyaashooda ama xambaareyaashooda siiyaan macluumaad kasta oo loogu baahdo sheegashadan ama sheegasho Medicare oo la xidhiidha. Waxan weydiisanayaa in bixinta anfacyada la amray la sameeyo oo iyada oo wakiil la iga yahay toos loo siiyo OhioHealth iyo dhakhaatiirta iyo kooxaha i siinaya daryeel caafimaad.

Macluumaadka Isticmaal La'aanta Tubaakada ama Sigaarka: Isticmaalka tubaakada ama sigaarka nooc kasta ha ahaado lagama oggola gudaha ama dibadda goobaha badhtamaha Ohio ee OhioHealth. Adeecidda habdhaqanka isticmaal la'aanta ee OhioHealth ayaa laga filayaa dhammaan bukaanka iyo booqdeyaasha.

Ogeysiiska Asturnaanta: Waxa la i siiyay koobi ah Ogeysiiska Habdhaqanada Asturnaanta ee OhioHealth gudaha sannadkii tagay.

Alaabta Qiimaha Leh ee Shakhsiga: OhioHealth mas'uul kama ah wixii ah alaab shakhsi oo luntay, la xaday, ama waxyeelo gaadhay.

Loogu Talogalay Kaliya Bukaanka Cisbitaalka:

- Cisbitaal Waxbarid: Waan fahmay in goobtani tahay cisbitaal waxbarid waana aan oggolahay in loo oggolaado ardayda caafimaadka, tababarteyaasha, dhakhaatiirta tababar ku jirta, ardayda deeq waxbarasho u jooga, kalkaalisooyinka iyo shaqaalaha daryeel inay gargaar ka geystaan iyo/ama kala qaybgalaya dhakhtarka(dhakhaatiirta) qabashada hawlogalo cilad-sheegid, caafimaad, iyo qalliin ee laga yaabo in la ii qabto iyaga oo hoos imanaya tilmaanta iyo maareynta dhakhaatiirtayda.
- Macluumaadka Qiimaha: Waan fahmay inaan xaq u leeyaha macluumaadka qiimaha ee Cisbitaalka sida lagu xusay Xeerka la Naqtiimay ee Ohio 3727.12.
- Daryeelka Caafimaadka ee Guriga (Home Health), Goob Daryeel (Hospice) iyo Qalab Caafimaad oo Mudo Dheer (Durable Medical Equipment) (DME): Waan fahmay inaan xor u ahay inaan doorto iyo inaan xaq u leeyahay inaan doorto bixiyahayga/siiyahayga daryeel ka dib sii-dayn ee laga yaabo inaan u baahdo. Waan ka warqabaa in, si loo fiicneeyo sii-socodka iyo tayada daryeelka, uu cisbitaalku badanaa isticmaali doono HomeReach ama shuraako OhioHealth oo kale marka ay tahay daryeelka caafimaadka ee guriga, adeegyo goob daryeel, iyo DME ka dib sii-dayn haddii aanan dooran bixiye/siiye kale. Waan fahmay in xidhmada qoraalada Dhigista/Diiwaangalinta la igu siin doono liiska hay'adaha daryeelka caafimaadka ee guriga ee la heli karo iyo inaan weydiisan karo qorsheeye sii-dayn in la i siiyo koobi kale oo ah liiska ama inaan sheegi karo dookhayga ah bixiye kale wakhti kasta.
- Xuquuqda Bukaanka: Waxa la i siiyay koobi ah macluumaadka "Xuquuqda Bukaanka". Waxa warqaddan ama foomkan sidoo kale laga heli karaa www.ohiohealth.com.
- Dardaaran Hormaris ah: Waxa la i siiyay koobiga macluumaadka OhioHealth ee ku saabsan Dardaaran Hormaris ah. Waxa warqaddan ama foomkan sidoo kale laga heli karaa www.ohiohealth.com.
- Waxa aan qirayaa in la siiyay fursad aan ku diido in la igu daro liiska laga fiiriyo dadka ku jira goobta waxana la i siiyay macluumaad dheeraad oo ah sida aan weydiistay.

Qirid

Marka aan saxeexo hoos waxa aan qirayaa inaan akhriyay oo aan fahmay Oggolaanshahan iyo Amar-siintan iyo in la siiyay fursad aan ku weydiiyo su'aalo oo ku helo cadeyn si aan si buuxda u fahmo oo u oggolaado Oggolaanshahan iyo Amar-siintan:

Magac Bukaan (oo daabacan): _____ **Taariikh Dhalasho:** _____

SAXEEXA BUKAANKA	TAARIIKH	WAKHTI
SAXEEXA WAKIILKA BUKAANKA EE AMAR HAYSTA	TAARIIKH	WAKHTI
SAXEEXA MARKHAATIGA SAXEEXA WAKIILKA	TAARIIKH	WAKHTI

OhioHealth

1CNT

PATIENT IDENTIFICATION LABEL

GENERAL CONSENT